# WellRide

# Tilmaamaha Gaadiid Raacaha Gaadiidka Caafimaad Ee Aan Degdega Ahayn 2025

Tilmaamaha Gaadiid Raacaha Gaadiidka Caafimaad Ee Aan Degdega Ahayn ee WellRide oo Dhaqan galaya 01/01/2025

Xubnaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay wax ka ogaadaan sidoo kalena isticmaalaan barnaamijyadayada iyo adeegyadayada.   Wakiilada xubinta, xubnaha ka tirsan qoyska, iyo daryeel bixiyayaashu waxay isticmaali karaan caawimaada lacag la'aanta ah ee hoos ku qoran marka ay isticmaalayaan caawimaad si loo fahmo caafimaadka iyo daryeelka xubinta.

Haddii aad leedahay naafanimo, YCCO ayaa haysa noocyadan caawimaad oo lacag la'aan ah:

- Turjubaannada luqadda calaamadaha oo la aqoonsan yahay
- Macluumaad qoraal ah oo ku qoran farta waaweyn, cajalada la duubo, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille, ama qaabab kale
- Isticmaalka caawimaad dheeraad ah, oo uu ku jiro qoraal, si loo fahmo macluumaadka la bixiyay
- Wax ka beddel macquul ah oo kale

Haddii aad u baahan tahay caawimaad luqaddeed, YCCO ayaa haysa noocyadan caawimaad oo lacag la'aan ah:

- Turjubaano la aqoonsan yahay
- Macluumaad qoraal ah oo ku qoran ku qoran luqaddo kale

Helitaanka xubnaha ee adeegyo caymiskooda la daboolo, cabasho, ama rafcaano, ama dacwad dhageysiga lama diidi doono ama lama xaddidi doono iyada oo lagu saleynayo

baahida loo qabo qaabab beddel ah iyo/ama caawimaad dheeraad ah

## Aan kala takoorka Ku dhisnayn

Takoorku wuxuu ka soo horjeedaa sharciga. YCCO iyo daryeel bixiyayaasheedu waa in ay raacaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka iyo federaalka. Dadka, xubnaha, ama xubnaha suurtagalka ah ulama dhaqmi karno si aan caddaalad ahayn mid kasta oo ka mid ah barnaamijyadayada ama hawlaha iyada oo sababtu tahay qofka:

- Da'diisa
- Midabkiisa
- Naafanimadiisa
- Dalka uu ka soo jeedo, luqaddiisa koowaad, iyo aqoontiisa luqadda Ingiriisiga
- Jinsigiisa
- Diintiisa
- Jinsiyadiisa, sifooyinkiisa jinsi, dookhiisa galmo, aqoonsigiisa jinsi, iyo fikradaha qaldan ee laga qabo jinsigiisa
- Uur lahaanshaheega iyo xaaladaha la xiriira
- Xaaladiisa caafimaad ama baahiyaha uu u qabo adeegyada

Haddii aad dareento in laguula dhaqmay si aan caddaalad ahayn mid ka mid ah sababaha kor ku xusan waxaad sameyn kartaa cabasho ama tabasho.

**Samee (ama ugu gudbi) cabasho YCCO mid ka mid ah siyaabahani:**

- Telefoonka: Isku-duwaha Qaybtayada 1557 ka wac (khadka bilaashka ah) 833-257-2192 (TTY/TDD711)
- Fax-ka: 503-765-9675
- Boosta: Yamhill Community Care
  Attn: Khabiirka Tabashada
  P.O. Box 5490
  Salem, OR 97304
- Email-ka: complaints@yamhillcco.org Haddii email-kaagu leeyahay macluumaad shakhsi ahaaneed geli “secure” saddarka mawduuca.
- Web-ka: https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/

Haddii aad rabto in aad cabashadaada ka dhigto mid qoraal ah waxaad warqad noogu soo diri kartaa boosta, email, ama fax. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foomka cabashada YCCO ama OHP oo noogu soo diri kartaa. Waxaad labada foom ka heli kartaa halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/. Ma aha in aad haysato foom; waxaad qori kartaa warqad ama email.

Caawimaad ma uga baahan tahay gudbinta cabasho? Ma u baahan tahay caawimaad luqaddeed ama wax ka beddel macquul ah? Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 wixii la xiriira cawimaad ama waxaad codsan kartaa magaca iyo lambarka telefoonka qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah, ama hagaha caafimaadka shakhsi ahaaneed.

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad cabasho u gudbiso mid ka mid ah ururadani:

**Oregon Health Authority (OHA) Civil Rights**

- Telefoonka: (844) 882-7889, 711 TTY
- Web-ka: www.oregon.gov/OHA/EI
- Email-ka: oha.publiccivilrights@odhsoha.oregon.gov
- Boosta: Office of Equity and Inclusion Division
  421 SW Oak St., Suite 750
  Portland, OR 97204

**Bureau of Labor and Industries Civil Rights Division**

- Telefoonka: (971) 673-0764
- Web-ka: https://www.oregon.gov/boli/civil-rights
- Email-ka: BOLI_help@boli.state.or.us
- Boosta: Bureau of Labor and Industries Civil Rights Division
  800 NE Oregon St., Suite 1045
  Portland, OR 97232

**U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights (OCR)**

- Web-ka: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf
- Telefoonka: (800) 368-1019, (800) 537-7697 (TDD)
- Email-ka: OCRComplaint@hhs.gov
- Boosta: Office for Civil Rights
  200 Independence Ave. SW, Room 509F, HHH Bldg.
  Washington, DC 20201

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, la xiriir Khabiirkayaga Tabashada.

- Telefoonka: (khadka bilaashka ah) 833-257-2192 (TTY/TDD) 711

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama qabto su'aalo, fadlan Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 ama TTY 711.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Turjubaanada Daryeelka Caafimaadka ee la aqoonsan yahay Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 ama TTY 711. Haddii aad turjubaan uga baahan tahay ballamahaaga, u sheeg xafiiska adeeg bixiyahaaga in aad u baahan tahay turjubaan ama luqaddee.

Todos los miembros tienen derecho a conocer y utilizar nuestros programas y servicios. Los representantes de los miembros, los miembros de la familia y los cuidadores pueden usar la ayuda gratuita a continuación cuando usan la ayuda para comprender la salud y la atención del miembro. Damos este tipo de ayuda gratuita:

- Lenguaje de señas;
- Intérpretes;
- Materiales en otros idiomas; y
- Braille, letra grande, audio y cualquier otro formato que le funcione mejor.

Si necesita ayuda o tiene preguntas, llame a Atención al Cliente al 855-722-8205 or TTY 711. Si usted necesita un intérprete en sus citas, infórmele al consultorio de su proveedor que necesita

uno y para qué idioma. Para obtener información sobre intérpretes de atención médica certificados, llame a Servicio al Cliente al 855-722-8205.

**English**

You can get this document in other languages, large print, braille, or a format you prefer. You can also ask for an interpreter. This help is free. Call 855-722-8205 or TTY 711. We accept relay calls.

-

You can get help from a certified and qualified health care interpreter. letter

**Spanish**

Puede obtener este carta en otros idiomas, en letra grande, braille o en un formato que usted prefiera. También puede recibir los servicios de un intérprete. Esta ayuda es gratuita. Llame al servicio de atención al cliente 855-722-8205  o TTY 711 Aceptamos todas las llamadas de retransmisión.

-

Usted puede obtener ayudar de un intérprete certificado y calificado en atención de salud.

**Russian**

Вы можете получить это документ
 на другом языке, напечатанное крупным шрифтом, шрифтом Брайля или в предпочитаемом вами формате. Вы также можете запросить услуги переводчика. Эта помощь предоставляется бесплатно.

Звоните по тел. 855-722-8205  или TTY 711. Мы принимаем звонки по линии трансляционной связи.
-
Вы можете получить помощь от аккредитованного и квалифицированного медицинского переводчика.

## Vietnamese

Quý vị có thể nhận tài liệu này bằng một ngôn ngữ khác, theo định dạng chữ in lớn, chữ nổi Braille hoặc một định dạng khác theo ý muốn. Quý vị cũng có thể yêu cầu được thông dịch viên hỗ trợ. Sự trợ giúp này là miễn phí. Gọi 855-722-8205  hoặc TTY (Đường dây Dành cho Người Khiếm thính hoặc Khuyết tật về Phát âm) 711. Chúng tôi chấp nhận các cuộc gọi chuyển tiếp.
-
Quý vị có thể nhận được sự giúp đỡ từ một thông dịch viên có chứng nhật và đủ tiêu chuẩn chuyên về chăm sóc sức khỏe.

## Arabic

يمكنكم الحصول على هذا الخطاب بلغات أخرى، أو مطبوعة بخط كبير، أو مطبوعة على طريقة برايل أو حسب الصيغة المفضّلة لديكم. كما يمكنكم طلب مترجم شفهي. إن هذه المساعدة مجانية. اتصلوا على 855-722-8205 أو المبرقة الكاتبة 711. نستقبل المكالمات المحولة.
-
يمكنكم الحصول على المساعدة من مترجم معتمد ومؤهل في مجال الرعاية الصحية.

## Somali

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille ama qaabka aad doorbidayso.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Taageeradani waa lacag la’aan. Wac 855-722-8205 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

-

Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaanka daryeelka caafimaadka oo xirfad leh isla markaana la aqoonsan yahay.

## Simplified Chinese

您可获取本文件的其他语言版、大字版、盲文版或您偏好的格式版本。您还可要求提供口译员服务。本帮助免费。致电 855-722-8205 或 TTY 711。我们会接听所有的转接来电。

-

您可以从经过认证且合格的医疗口语翻译人员那里获得帮助。

## Traditional Chinese

您可獲得本信函的其他語言版本、大字版、盲文版或您偏好的格式。您也可申請口譯員。以上協助均為免費。請致電 855-722-8205 或聽障專線 711。我們接受所有傳譯電話。

-

您可透過經認證的合格醫療保健口譯員取得協助。

## Korean

이 서신은 다른 언어, 큰 활자, 점자 또는 선호하는 형식으로 받아보실 수 있습니다. 통역사를 요청하실 수도 있습니다.

무료 지원해 드립니다. 855-722-8205 또는 TTY 711 에 전화하십시오. 저희는 중계 전화를 받습니다.
-
공인 및 자격을 갖춘 의료서비스 전문 통역사의 도움을 받으실 수 있습니다.

## Chuukese

En mi tongeni angei ei taropwe non pwan ew fosun fenu, mese watte mak, Braille ika pwan ew format ke mwochen. En mi tongeni pwan tingor emon chon chiaku Ei aninis ese fokkun pwan kamo. Kokori 855-722-8205 ika TTY 711. Kich mi etiwa ekkewe keken relay.
-
En mi tongeni kopwe angei aninis seni emon mi certified ika qualified ren chon chiaku ren health care.

| Ukrainian |
| --- |
| Ви можете отримати цей довідник іншими мовами, крупним шрифтом, шрифтом Брайля або у форматі, якому ви надаєте перевагу. Ви також можете попросити надати послуги перекладача. Ця допомога є безкоштовною. Дзвоніть по номеру телефону 855-722-8205 або телетайпу 711. Ми приймаємо всі дзвінки, які на нас переводять.<br>-<br>Ви можете отримати допомогу від сертифікованого та кваліфікованого медичного перекладача. |

| |
|---|
| Farsi |
| می‌توانید این نامه را به زبان‌های دیگر، درشت‌خط، بریل یا قالب ترجیحی دیگری دریافت کنید. می‌توانید مترجم شفاهی نیز درخواست کنید. این کمک رایگان است. با 855-722-8205 یا TTY 711 تماس بگیرید. تماس‌های رله را می‌پذیریم.<br>-<br>می‌توانید از یک مترجم شفاهی دارای گواهی و باکفایت در زمینه بهداشت و |
| Swahili |
| Unaweza kupata herufi hii kwa lugha zingine, kwa herufi kubwa, kwa lugha ya maandishi kwa vipofu au namna yeyote unayopendelea. Unaweza pia kuomba mkalimani. Msaada huu ni wa bure. Piga 855-722-8205 au TTY 711. Tunakubali simu za kupitisha ujumbe.<br>-<br>Unaweza pata usaidizi kutoka kwa mkalimani wa huduma ya afya aliyeidhinishwa na aliyehitimu. |
| Burmese |
| ဤစာကို အျခားဘာသာစကားမ်ား၊ ပုံႏွိပ္စာလုံးႀကီး၊<br>မ်က္မျမင္မ်ားအတြက္ ေဘရးလ္ သို႔မဟုတ္ သင္ပိုမိုႏွစ္သက္သည့္<br>ပုံစံျဖင့္ ရယူႏိုင္ပါသည္။ သင္သည္ စကားျပန္တစ္ဦးလည္း<br>ေတာင္းဆိုႏိုင္ပါသည္။ ဤအကူအညီသည္ အခမဲ့ျဖစ္ပါသည္။ 855-<br>722-8205 သို႔မဟုတ္ 711 ကို ဖုန္းဆက္ပါ။<br>ထပ္ဆင့္ေခၚဆိုမႈမ်ားကို ကၽြႏ္ုပ္တို႔ လက္ခံပါသည္။<br>- |

| |
|---|
| သင်သည် သင်တန်းဆင်းလက်မှတ်ရနှင့် အရည်အချင်းပြည့်သည့် ကျန်းမာရေး စောင့်ရှောက်မှု စကားပြန်မှလည်း အကူအညီရယူနိုင်ပါသည်။ |
| Amharic |
| ይህንን ደብዳቤ በሌሎች ቋንቋዎች፣ በትልቅ ህትመት፣ በብሬይል ወይም እርሶ በሚመርጡት መልኩ ማግኘት ይችላሉ። በተጨማሪም አስተርጓሚ መጠየቅም ይችላሉ። ይህ ድጋፍ የሚሰጠው በነጻ ነው። ወደ 855-722-8205 ወይም TTY 711 ይደውሉ። የሪሌይ ጥሪዎችን እንቀበላለን።<br>-<br>ፍቃድ ካለው እና ብቃት ካለው የጤና እንክብካቤ አስተርጓሚ ድጋፍ ማግኘት ይችላሉ። |
| Romanian |
| Puteți obține această scrisoare în alte limbi, cu scris cu litere majuscule, în Braille sau într-un format preferat. De asemenea, puteți solicita un interpret. Aceste servicii de asistență sunt gratuite. Sunați la 855-722-8205 sau TTY 711. Acceptăm apeluri adaptate persoanelor surdomute.<br>-<br>Puteți obține ajutor din partea unui interpret de îngrijire medicală certificat și calificat. |

## Macluumaadka Website-ka

Tilmaamaha Gaadiid Raacaha NEMT waxaa lagu bixiyaa foomka warqada ah. Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 si laguugu soo diro. Waxaad ku heli doontaa muddo 5 maalmo shaqo

gudahood ah.  Waxaad sidoo kale ka arki kartaa website-kayaga halkan https://yamhillcco.org/members/transportation/ . Waxaad ka soo dejisan kartaa ama ka soo daabacan kartaa website-ka.

Marka aad codsato iyo iyada oo la haysto oggolaanshahaaga waxaan kuu soo diri karnaa nuqulka Tilmaamaha Gaadiid Raacaha.   Wac Adeega Macmiilka ama email noogu soo dir info@yamhillcco.org si aad u sameyso codsi.  Waxaad heli doontaa nooc la mid ah midkan oo kale.  Dhammaan noocyada Tilmaamaha Gaadiid Raacuhu waa isku mid.  Noo sheeg luqadda ama qaabka aad u baahan tahay.  Kani waa mid la’aan ah.

## Macluumaadka Lagala soo  xiriirayo YCCO


**Yamhill Community Care**
**Administrative Office:**
807 NE Third Street
McMinnville, OR 97128
855-722-8205   TTY/TDD 711
Fax-ka: 503-376-7436

Saacadaha Xafiiska Maamulka:
Isniinta – Jicmaha 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo

Website-ka: www.yamhillcco.org

Waanu xiranahay Maalinta U Horeysa Sanadka Cusub, Maalinta Martin Luther King Jr, Maalinta
Madaxweynayaasha, Maalinta Xasuusta ‘Memorial Day’, Maalinta Xoriyadda, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Mahadnaqa ‘Thanksgiving Day’, Jimcaha ka dambeeya Maalinta Mahadnaqa iyo Ciida Masiixiga.

Xafiisyadayadu waa kuwo kursiga naafadu soo geli karo.

**YCCO Customer Service:**
855-722-8205 TTY: 711
Isniinta-Jicmaha 8 subaxnimo - 5 galabnimo.
Fax-ka: 503-376-7436

**WellRide Customer Service:**
844-256-5720 TTY: 711
Isniinta-Jicmaha 7:30 subaxnimo - 6 galabnimo.

## Waxyaabaha ay ka kooban yihiin


Waxa uu yahay Gaadiidka Caafimaad ee Aan Degdega Ahayn (NEMT)……....14
- Yaa Isticmaali Kara NEMT?
- Inta uu Le’eg yahay Kharashka Ku baxaya NEMT

Macluumaadka Lagala soo xiriirayo WellRide..……..........................................14

Wicitaanka WellRide……………..……………….......................................................... 15
- Dejinta Gaadiid Raacid.
- Gaadiid Raacida Loogu talagalay Carruurta
- Waajibaadka WellRide Marka Aad Dejiso Gaadiid Raacid
- Xubnaha U qalma Faa’iidada Buuxda ee Labada ah (FBDE)
- Gaadiid Raacida Aan La oggolaanin
- Go’aaminta Qaabka Gaadiid Raacida iyo Heerka Adeega Ku habboon
- Macluumaadka Ka qayb qaataha
- Isbeddelada iyo Badbaadada
- Gaadiidka Sugan
- Cimilada Xun iyo Qorshayaasha Beddelka ah

Soo qaadida iyo Dejinta Xubinta ……………………………………………….……19

Xuquuqda iyo Waajibaadka Xubinta……......……………………………..……….20

Masaafada la socdo, Cuntooyinka, iyo Hoyga Lacagtiisa la isku soo celiyay (Dib loo bixiyay)…………………….............................................................................……21

Nidaamka Tabashada (Cabashooyinka, Rafcaanada, iyo Dhageysiyada Maamulka.................................................................................................23

Cabashooyinka
Rafcaanada
Dhageysiyada Maamulka

Badbaadada iyo Raaxada Gaadiid Raacaha…………………………...…….30

Xeerarka Baabuurka iyo Darawalka……….………………..……….……………30

Macluumaad Dheeraad ah.…………………………...………….....……31

## Waxa uu yahay Gaadiidka Caafimaad ee Aan Degdega Ahayn

Gaadiidka caafimaad ee aan degdega ahayn NEMT waa adeeg bixiya gaadiid raacid lacag la'aan ah oo loogu talagalay xubnaha YCCO oo lagu aado booqashooyinka daryeelka caafimaadka ee caymiskooda la daboolo ama adeegyada, oo ay ku jiraan adeegyada la xiriira caafimaadka. Magaca bixiyaha YCCO NEMT waa WellRide.

### Cidda Isticmaali Karta NEMT

Xubin kasta oo ka tirsan YCCO. Gaadiid raacida waxaa dejin kara xubin ama wakiilka xubin.

### Inta uu Le'eg yahay Kharashka Ku baxaya NEMT

NEMT waa mid lacag la'aan ah.  Xubnaha marnaba laguma soo dalaco lacag ama biilka gaadiid raacida lagu tagayo ama lagaga soo noqonayo adeegyada caafimaad ee ay caymiskooda daboolaan WellRide, YCCO, Bixiyayaasha Gaadiidka, ama Darawiiliinta. Xubnuhu ma aha in ay bixiyaan lacagta gaadiid raacida xataa haddii YCCO, WellRide, ama Bixiyaha Gaadiidku ay diidaan lacagta raacida gaadiidka ee loogu talagalay adeega.

## Macluumaadka Lagala soo xiriirayo WellRide

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo booqashooyinka gaadiidka caafimaad ee aan degdega ahayn, ilkaha, ama caafimaadka hab-dhaqanka, wac YCCO WellRide.

**YCCO WellRide**
Khadka bilaashka ah: 844-256-5720
Adeegyada Gudbinta Wararka ee Oregon/TTY: 711
Saacadaha shaqada: 7:30 subaxnimo-6 galabnimo, Isniinta-Jicmaha

**Adeegyada NEMT ee caymiskooda la daboolo waxaa la bixiyaa 24 saacadood maalintii, 365 maalmood sanadkii.**
Waxaa jira Adeega Macmiilka oo ah saacadaha shaqada ka dib, wac lambarka khadka telefoonka oo lacag la'aan ah haddii aad u baahan tahay caawimaad. Waxaa jirta farriin ku qoran Ingiriisi iyo Isbaanish, oo sheegaysa sida loo helo caawimaad saacadaha shaqada ka dib. Haddii aad u dhaafto farriin saacadaha shaqada ka dib oo uu si cad loo maqli karo oo leeyahay lambarka telefoonka oo wanaagsan, waanu soo wici doonaa maalinta shaqo ee xigta. Waxaan isku dayi doonaa marar badan in aanu kuula soo xiriirno ilaa aan taasi ka sameynayno ama, haddii la awoodi waayo, farriin ayaa la dhaafi doonaa. Shaqaalaha Xarunta Wicitaanka ayaa diiwaanka geliya dhammaan dadaalada lagu soo celinayo wicitaankaaga ama ka jawaaba farriin. Haddii aad yeelanayso xaalad degdeg ah, waa in aad wacdaa 911.

Xarunta wicitaanta ee WellRide way xiran tahay Maalinta U Horeysa Sanadka Cusub, Maalinta Xasuusta 'Memorial Day', Afarta Luulyo, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Mahadnaqa 'Thanksgiving Day', iyo Maalinta Ciida Masiixiga.

**Waxaa jira shaqaale la aqoonsan yahay oo luqaddo badan ku hadla oo loogu talagalay soo wacayaasha iyo fasiraad dhanka afka oo ay sameynayaan adeega turjumaada dhanka telefoonka aan wax lacag ahi kaaga baxayn xubnaha.**
**Tani waxaa ka mid ah dadka maqalkooda iyo hadalkoodu liito. Adeega Macmiilka ee WellRide ka wac 844-256-5720 ama TTY 711.**

## Wicitaanka WellRide

Marka ugu horreysa ee aad soo wacdo, waxaanu wax kaaga sheegi doonaa NEMT oo ka hadli doonaa baahiyahaaga gaadiid raacid. Xubinta, xubinta waalidka ah ama mas'uul, wakiilka xubinta (sida Shaqaalahooda Caafimaadka Bulshada, waalid wax korsanaya, waalid si joogto ah wax u korsanaya, ama adeeg bixiye kale ee loo xilsaaray maamulkani ayaa dejin kara gaadiid raacid. Faldan hayso lambarkaaga Aqoonsiga YCCO, kani waa mid la mid ah lambarkaaga Aqoonsiga OHP.

### Dejinta Gaadiid Raacid

Marka aad soo wacdo si aad u dejiso gaadiid raacid,  waxaanu codsan doonaa:

- Magaca xubinta iyo taariikhda dhalasho
- Cinwaanka la iska soo qaadayo
- Lambarkaaga telefoonka
- Lambarka aqoonsiga
- Magaca dhakhtarka ama xarunta caafimaadka
- Cinwaanka dhakhtarta ama xarunta caafimaadka
- Taariikhda booqashada
- Waqtiga booqashada
- Waqtiga qaadista booqashada ka dib
- Wixii baahiyo gaar ah, sida kursiga naafada
- Sida uu awood ugu leeyahay in uu dhaqdhaqaaqo gaadiid raacuhu
- Miyuu qof raaci doonaa gaadiid raacaha
- Sida aad rabto in aanu kuula soo xiriirno (wicitaan telefoon, email, ama fax) iyo waqtiga maalintii

**Gaadiid raacidu waxay noqon kartaa:**

- Mid la dejin karo 90 maalmood ka hor
- Wax badan hal adeeg ama kuwa dib u soo noqnoqda 90 maalmood ka hor
- Booqashooyin isla maalintaas ah

## Gaadiid Raacida loogu talagalay Carruurta

Marka aad soo wacdo si aad u dejiso gaadiid raacid loogu talagalay ilme 12 jir ah iyo ka yar, waxaan sidoo kale u baahan doonaa in aan ogaano:

- Magaca ilmaha
- Lambarka aqoonsiga
- Taariikhda dhalasho
- Haddii ilmahaagu u baahan yahay kursiga ilmaha
- Magaca qofka weyn ee la joogi doona ilmahaaga, qofka weyni wuxuu noqon karaa hooyada, aabaha, hooyada aan dhabta ahayn, aabaha aan dhabta ahayn, qof awoowe/ayeeyo ah, ama mas'uul.

## Waajibaadkayaga Marka Aad Dejiso Gaadiid Raacid

Marka aad soo wacdo si aad u dejiso gaadiid raacid waxaanu:

- Xaqiijin doonaa in qofka xubinta ahi yahay mid si firfircoon uga tirsan YCCO OHP, Barnaamijka Ilkaha ee Compact Free Association (COFA), ama Barnaamijka Ilkaha ee Qofka soo Halgama.   Tani waxaa ka mid ah xubnaha U qalma Faa'iidada Buuxda ee Labada ah (FBDE).
- Xaqiijin doonaa in xubnaha U qalma Faa'iidada Buuxda ee Labada ah ama FBDE ay yihiin kuwo firfiroon oo leh Medicare Advantage, Qorshaha Baahiyaha Gaarka ee Labada ah, ama Medicare.
- Xaqiijin doonaa in gaadiid raacidu tahay mid lagu aadayo adeega OHP caymiskiisa daboosho ama adeegyada la xiriira caafimaadka.

- Xaqiijin doonaa in gaadiid raacida FBDE ay tahay mid loogu talagalay OHP ama adeeg ay caymiskiisa daboosha Medicare oo ka jira degaanka adeega ee YCCO. Haddii uu yahay mid ka baxsan degaankayaga uu caymisku daboolo ma aha mid laga bixinayo degaankayaga waana in aan bixinaa lacagta kharashka la wadaagayo, oo uu ku jiro adeega gaadiid raacida.
- Xubnaha ka diiwaangashan Barnaamijka Ilkaha ee Compact Free Association (COFA), ama Barnaamijka Ilkaha ee Qofka soo Halgama, YCCO waxay dabooli doontaa adeegyada NEMT ee loogu talagalay booqashooyinkooda ilkaha oo kaliya.
- Xaqiijin doonaa haddii loo baahan yahay gaadiid raacid sugan.
- Kuu sheegi doonaa macluumaadka gaadiid raacida inta lagu gudo jiro wicitaanka ama isla marka gaadiid raacida lala dejiyo darawalka.
- Oggolaan doonaa, dejin doonaa, ama ku diidi doonaa codsiga gaadiid raacida muddo 24 saacadood gudahood ah laga bilaabo markii la codsaday. Tani waxaa ka mid ah dhammaan qaybaha safarka. Waqtiga la qabtay ee 24 saacadood ah ayaa ka yaraan kara haddii loo baahdo si loo xaqiijiyo in qofka xubinta ahi uu booqashadiisa ku helay waqtigii loogu talagalay.
- Dhammaan gaadiid raacida waxaa la dejin doonaa ka hor taariikhda booqashada, iyada oo gaadiid raacahana lagu ogeysiin doono wax aan ka yarayn 2 maalmood ka hor dejinta gaadiid raacida.
- Haddii gaadiid raacida la codsaday uu ka yar yahay laba (2) maalmood ka hor waqtiga qaadista ee la qorsheeyay, CCO ama wakiilkeeda NEMT ee qandaraas-hoosaadka leh waa in ay qofka Xubinta ah siiyaan lambarka telefoonka wakiilka oo ay dhici karto, balse aan la iskaga baahayn, in ay sidoo kale qofka Xubinta ah siiyaan magaca iyo lambarka telefoonka darawalka NEMT ama Bixiyaha NEMT
- Marka gaadiid raacida la dejiyo waanu kuu sheegi doonaa oo xaqiijin doonaa:
  - Magaca iyo lambarka telefoonka bixiyaha NEMT,
  - Taariikhda iyo waqtiga dejinta,
  - Cinwaanka soo qaadistaada, iyo
  - Magaca iyo cinwaanka booqashada adeeg bixiyaha

Waxaanu bixinaa gaadiid raacid ka baxsan degaanka adeegyada OHP caymiskiisa daboosho.

### Xubnaha U qalma Faa'iidada Buuxda ee Labada ah (FBDE)

NEMT waa mid ay heli karaan xubnaha FBDE ee u baahan gaadiid raacida ka jirta degaanka adeega ee YCCO ee loogu talagalay OHP ama adeeg ay caymiskiisa daboosha Medicare oo ka jira degaanka adeega ee YCCO. Haddii uu yahay mid ka baxsan degaankayaga uu caymisku daboolo ma aha mid laga bixinayo degaankayaga waana in aan bixinaa lacagta kharashka la wadaagayo, oo uu ku jiro adeega gaadiid raacida.

### Gaadiid Raacida Aan La oggolaanin

Haddii gaadiid raacidaada aan la oggolaan waxaa laguugu sheegi doonaa muddo 24 saacadood gudahood ah laga bilaabo codsigaaga. Waqtigani waxaa dhici karta in uu gaaban yahay si loo xaqiijiyo in aad waqtigii loogu talagalay ku timaado booqashadaada.

Marka aynaan oggolaan gaadiid raacid warqad ayaa boosta laguu soo diri doonaa. Warqada waxaa loo yaqaanaa ogaysiinta go'aaminta gargaarka aan wanaagsanayn ama NOABD. Waxaad ogaan kartaa waxyaabo dheeraad oo ku saabsan gaadiid raacida aan la oggolaan iyo rafcaankaaga iyo dacwad dhageysiga adiga oo wacaya Adeega Macmiilka ama qaybta Nidaamka Tabashada ee tilmaamahani ku qoran bogga 23.

## Go'aanada Qaabka Gaadiid Raacida iyo Heerka Adeega Ku habboon

WellRide ayaa gaari doonta dhammaan go'aanada ku saabsan qaabka gaadiid raacida iyo heerka adeega saxda ah. Qaabka gaadiid raacidu waa hab lagaaga soo kaxeynayo meel ee lagugu geynayo meel kale. Qaarka mid ah noocyada qaababku waa baabuurka van-ka oo leh kursiga naafada ama sedan. WellRide ayaa qorsheysa oo qoondeysa safarka lagu aadayo bixiyaha NEMT ee saxda ah.

Liiska hoos ku qoran ayaa dib loo eegi doonaa ee ku saabsan gaadiid raace kasta si loo go'aamiyo qaabka gaadiid raacida:

- Awooda lagu soconayo, haddii ay u baahan yihiin qalabka socodka 'walker', usha, kursiga naafada.
- Awooda lagu dhaqdhaqaaqayo ama la isku dhaqaajinayo.
- Awooda lagu gudanayo hawlaha nolol maalmeedka.
- Baahida loo qabo caawimaad, haddii ay haystaan caawiye, waxay buuxinayaan xeerarka caawiyaha.
- Xaaladaha gaarka ama baahiyaha oo ay ku jiraan naafanimada jireed ama caafimaadka hab-dhaqanka.
- Heerka adeega ku habboon baahiyaha adeeg ee (bannaanka la iska qaadayo/la isku dejinayo 'curb-to-curb ', albaabka la iska qaado/dejiyo, ama gacanta wax la iskaga dhiibayo 'hand-to-hand')

## Macluumaadka Ka qayb qaataha

Caawiye 'attendant' waa qofka gaariga la raaca xubinta loogu talagalay gaadiid raacida NEMT. Qof kastaa ma yeelan karo qof gaariga la raaca iyaga. Xubnaha qaarkood waa in ay yeeshaan qof weyn oo caawiye ah haddii ay yihiin carruur da'doodu tahay 12 sano jir iyo ka yar ama xubin da'kasta ah oo qaba baahiyo jireed ama hab-dhaqan. Caawiyayaashu ma aha in ay bixiyaan lacagta si ay gaariga kuula raacaan. Xeerarka loogu talagalay caawiyayaashu waa:

- Waalidiinta ama mas'uuliyiintu in ay siiyaan caawiye gaariga la raaca dadka yeelan kara qof gaariga la raaca iyaga oo lagu tagayo oo lagaga soo noqonayo adeegyo caymiskooda la daboolo marka laga reebo:
    - Darawalka oo ah tabarucaha Waaxda Adeegyada Dadweynaha (DHS) ama shaqaale ama shaqaale Maamul;
    - Qofka xubinta ah oo u baahan gaadiid sugan; ama
    - Adeeg bixiyaha ambalaaska oo qaada qofka xubinta ah ee loogu talagalay adeegyada NEMT, oo aan lacag siino iyaga.

- Gaadiidka ambalaaska ee NEMT in ay yeeshaan caawiye marka aan isticmaalno ambalaas si loo siiyo kursiga naafada ama sariirta daryeelka ‘stretcher care’ ama raacida van-ka.
- Hooyada qofka xubinta ah, aabaha, hooyada aan dhabta ahayn, aabaha aan dhabta ahayn, qof awoowe/ayeeyo ah, ama mas’uul.
- Qof weyn oo kasta oo da’diisu tahay 18 sano jir ama ka weyn oo oggolaadeen waalidka ama mas’uulka qofka xubinta ah.
- Caawiyayaashu in ay gaariga la raacaan qofka xubinta ah ee uu kaga soo noqonayo goobta la iska soo qaadayo ee lagu aadayo booqashada iyo safarka soo noqoshada.
- Waalidka ama mas’uulka qofka xubinta ah, ama qof weyn oo daryeel bixiye ah in uu haysto oo rakibo kuraasta badbaadada. Darawaliintu ma qaadi karaan xubin haddii waalid ama mas’uul uusan haysin kursiga badbaadada oo buuxinaya sharciga gobolka.    Xubnahani waa in ay haystaan kursiga badbaadada ee ilmaha:
  - Kuwa dhererkooda ka yar yahay 4’9” ama culeyskoodu ka yar yahay pounds.
  - Kuwa ay da’doodu ka yar tahay 2 sano waa in sidoo kale si sax ah meel loogu xidhaa ‘secured’ kaasi oo ah nidaamka badbaadada ilmaha oo gadaal u jeeda.
  - Kuwa uu miisaankooda u ka badan yahay 40 pounds kana gaaban 4’9”, marka laga reebo haddii ilmaha si sax loogu xidhay nidaamka badbaadada oo buuxinaya xeerarka u yaala suunka badbaadada, suunka ‘harness’, iyo badbaadada ilmaha ee loogu talagalay nidaamyada badbaadada ilmaha ee loo sameeyay carruurta miisaankoodu ka badan yahay 40 pounds.

WellRide in ay go’aamiso haddii qof xubin ahi u baahan yahay caawimaad iyo haddii caawiyuhu uu buuxinayo xeerarka.

## Isbeddelada iyo Badbaadada

Waxaa jira waqtiyo marka gaadiid raacida loo baahan karo in la beddelo:

- Gaadiid raacaha oo qaba dhibaato caafimaad oo khatar toos ah ah ku ah darawalka ama dadka kale ee ku jira gaariga.
- Gaadiid raacaha oo sameeya hanjabaado waxyeello oo la geysanayo darawalka ama dadka kale ee ku jira gaariga.
- Gaadiid raacaha oo ka qayb qaata hab-dhaqan ama abuura xaalad darawalka ama dadka kale ee ku jira gaariga gelinaysa halis waxyeello.
- Gaadiid raacaha oo wax badan baajiya/joojiya ama aanan ku imaanin gaadiid raacidiisii taariikhda gaadiid raacida la dejiyay.
- Gaadiid raacaha oo ku lug yeesha hab-dhaqan, oo xukunka YCCO, oo sababa bixiyayaasha caafimaadka degaanka ama xarumuhu in ay diidaan in ay bixiyaan adeegyo dheeraad ah iyada oo aan la beddelin adeegyada si loo xaqiijiyo in adeeg bixiyuhu uu adeegyo caymiskooda la daboolo siin doono xubinta.

Haddii ay noqoto in aan beddelno gaadiid raacidaada iyada oo sababtu tahay mid ka mid ah kuwa kor ku xusan, waxaanu kuu soo diri doonaa ogeysiin qoraal ah.

Isbeddelada macquulka ah waxaa ka mid ah, balse aanan ku koobnayn, oo xubnaha looga baahan yahay in ay:

- Isticmaalaan bixiyaha gaadiidka oo gaar ah;
- La safraan caawiyaha;
- Isticmaalaan gaadiidka dadweynaha halka laga heli karo;
- Kexeeyaan ama raadiyaan qof xubinta kexeeya oo hela lacagta magdhawga ee masaafada la socdo ‘mileage’; ama
- Xaqiijiya in gaadiid raacida lala leeyahay bixiyaha NEMT maalinta la joogo ama maalinta ka hor gaadiid raacida la qorsheeyay.

### Gaadiid Sugan

Gaadiid sugan waa adeega NEMT oo loogu talagalay qaadida aan ikhtiyaariga ahayn ee xubnaha halista ugu sugan waxyeelaynta naftooda iyo dadka kale.   Gaadiid sugan ayaa la isticmaali karaa marka:

- Aanu xaqiijinay in qaadaha sugan uu buuxiyay dhammaan xeerarka gobolka iyo federaalka oo awoodo in uu qaado xubinta dhibaatada ku jira ama halis degdeg ah ugu sugan waxyeelaynta naftiisa iyo dadka kale ee ay sabab u yihiin dhibaatooyin maskaxeed ama dareen ama isticmaalka mukhaadaraadka; oo
- Gaadiidkuna yahay mid lagu aadayo xarunta Medicaid oo la aqoonsaday in ay awood u leedahay in ay daaweyso baahida caafimaadka degdega ah ama daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka ee xubinta dhibaatada ku sugan;
- Hal caawiye oo lagu daray uu raaci karo qofka xubinta ah iyada oo lacag la’aan ah, marka ay caafimaad ahaan ku habboon tahay sida in la siiyo daawo iyada oo jidka lagu sii jiro ama in la buuxiyo xeerar sharci ah oo ay ka mid yihiin balse aanan ku koobnayn, marka waalid ama mas’uul sharci ah ama qof wax galbinaya loo baahan yahay inta lagu jiro wax qaadida.

## Cimilada Xun iyo Qorshayaasha Beddelka ah

Waxaan siin doonaa gaadiid raacid xubnaha u baahan daryeel caafimaad oo muhiim ah inta lagu jiro cimilada xun.  Cimilada xun waxaa ka mid noqon kara kulaylka xad dhaafka ah ama qabowga, daadka, barafka culus, ama waddooyinka barafka leh.     Tusaalooyinka daryeel caafimaad ee muhiimka ah waa isku daaweynta shucaaca ‘chemotherapy' iyo sifeynta dhiigga ‘renal dialysis’.  Waanu ku soo wici doonaa marka ay jirto cimilo xun waxaanan adiga iyo adeeg bixiyahaaga kala shaqeyn doonaa doorashada ugu fiican oo aad leedahay.

Waxaa jira qorshayaal beddel ah oo loogu talagalay dalabka gaadiidka sarreeya ee aan la filayn iyo marka gaadiid raacidu ay run ahaantii soo daahdo (wax aan ka badnayn 15 daqiiqo) ama aan la awoodin in la sameeyo adeega dejinta gaadiid raacida.  Gaadiid raacayaasha waa la wici doonaa oo loo sheegi doonaa macluumaadka gaadiid raacida cusub sida ugu dhakhsaha badan ee aan karno.   Marka gaadiid raacida la dejiyo, waxaanu wax kaaga sheegi doonaa isbeddelada.  Haddii aysan heli karin darawal cusub,

ka dib waan kuu sheegi doonaa oo adiga iyo adeeg bixiyahaaga kala shaqeyn doonaa doorashada ugu fiican oo aad leedahay.

## Soo qaadida iyo Dejinta Xubinta

- Darawaliinta ayaa kuu sheegi doona marka ay u yimaadaan isku qaadida gaadiidka waxayna sugi doonaan ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib waqtiga qaadista.
- Haddii gaadiid raacuhu uusan imaanin ama uusan diyaar u ahayn is qaadida ka dib 15 daqiiqo, darawalka ayaa noo sheegi doona ka hor inta uusan tagin.
- Darawaliintu waxay bixiyaan heerka adeega ku habboon baahiyaha adeeg ee (bannaanka la iska qaadayo/la isku dejinayo ‘curb-to-curb ‘, albaabka la iska qaado/dejiyo, ama gacanta wax la iskaga dhiibayo ‘hand-to-hand’).
- Darawaliintu wax ku dejin maayaan ‘drop off’ booqashadooda wax ka badan 15 daqiiqo ka hor furitaanka xafiiska aan ka ahayn gaadiid raacaha, wakiilka gaadiid raacaha, mas’uulka, ama waalidka oo codsada.
- Gaadiid raacayaasha waxaa lagu dejin doonaa booqashadooda wax aan ka yarayn 15 daqiiqo ka dib waqtiga booqashada si looga hortaggo in waqtiga la is dejinayo loo arko is dejin la soo daahay.
- Gaadiid raacayaashu ma iman doonaan booqashadooda wax ka badan 1 saac ka hor waqtiga booqashada.
- Waqtiga la sugayo kama badnaan doono 15 daqiiqo oo ay dhaafto waqtiga qaadista ee dejisan.
- Waqtiyada qaadista ee dejisan waxay saamixi doonaan waqtiga saxda ah ee safar si loo xaqiijiyo in qofka xubinta ah haysto waqti uu iskaga soo xaadiro booqashadiisa.
- Darawaliintu wax kama soo qaadi doonaan ‘pick up’ booqashada wax ka badan 15 daqiiqo ka dib marka xafiiska la xiro, aan ka ahayn gaadiid raacaha, wakiilka gaadiid raacaha, mas’uulka, ama waalidka oo codsada gaadiid raacid hore loo sii dejiyay.
- Gaadiid raacida safarka soo noqoshada ee aanan hore loo sii dejin, waxaan xaqiijin doonaa in gaadiid raacaha lagu soo qaado saacad gudaheed ka dib marka loo sheego.
- Haddii isbeddelka gaadiid raacida loo baahdo digniin la’aan, WellRide waxay heli doontaa siyaabo ay safar ula dejiso darawal kale haddii loo baahdo.
- Darawaliintu ma bedeli doonaan waqtiga qaadista ee la qoondeeyay iyada oo aan la haysan oggolaanshaha WellRide oo hore loo sii diiwaan geliyay.
- Haddii darawalku yimaado ka hor waqtiga qaadista ee dejisan, gaadiid raacuhu ma aha in uu fuulo baabuurka ilaa laga gaarayo waqtiga qaadista ee dejisan.

## Xuquuqda iyo Waajibaadka Xubinta

Raacayaasha NEMT iyo caawiyayaashooda waxay leeyihiin xuquuqda iyo waajibaadka iyaga oo isticmaalaya adeegyada adeegyada gaadiid raacida.

Waxaad xaq u leedahay:

- Xuquuqda ah gaadiid raacid ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo oo ku habboon baahiyahaaga.
- Adeegyada turjumaada oo aan wax lacag ahi ku baxayn marka lala hadlayo Adeega Macmiilka.
- Macluumaadka NEMT oo ku qoran luqadda ama qaab ku habboon baahiyahaaga.
- In aad hesho ogeysiin qoraal ah marka gaadiid raacida la diido.
- Xubnuhu waxay xaq u leeyiiin in ay gudbiyaan cabasho ku saabsan adeegaaga NEMT, gudbiso rafcaan, codsato dacwad dhageysi, codsato labadoodaba haddii aad dareento in adeeg laguugu diiday si aan caddaalad ahayn.
- Waxaa laguu sheegi doonaa macluumaadka gaadiid raacida inta lagu gudo jiro dejinta gaadiid raacida.  Haddii tani aysan dhici karin, xiriir ayaa u dhici doona habka (wicitaan telefoon, email, farriin, fax) iyo waqtiga maalintii ee aad jeceshahay, si la isku siiyo macluumaadka gaadiid raacida isla marka la iska meel dhigo iyo ka hor taariikhda gaadiid raacida.
- Macluumaadka ku saabsan gaadiid raacidaada waa in ay ku jiraan:
    - magaca iyo lambarka telefoonka bixiyaha gaadiid raacida,
    - waqtiga booqashada iyo cinwaanka soo qaadista, iyo
    - magaca iyo cinwaanka adeeg bixiyaha ee loogu talagalay booqashada xubinta
- Xubnuhu ma aha in ay go'aan ka gaaraan haddii gaadiid raacidooda la dejiyay. Waxaa loo sheegi doonaa gaadiid raacidooda waqtiga ay soo wacaan si ay u dejiyaan ama waanu la xiriiri doonaa iyaga iyada oo la hayo macluumaadka.
- Adiga ama wakiiladaada, oo haysta oggolaansho qoraal ah, ayaa codsan kara gaadiid raacid.   Wakiilku waxaa dhici karta in uu yahay Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada, waalid wax korsanaya, waalid si joogto ah wax u korsanaya, ama adeeg bixiye kale oggolaansho la siiyay.
- Adiga ama wakiilkaaga ayaa dejin kara gaadiid raacida isla maalintaas ah.
- Waxaad laguu dejin doonaa adeeg bixiye si fiican ugu habboon baahiyahaaga marka la oggolaado gaadiid raacida.  Laguguma hayn doono bixiyaha jid go'an.
- Oggolaanshaha iyo dejinta, ama diidmada, gaadiid raacid leh dhammaan qaybaha safarka ayaa dhici doonta muddo 24 saacadood gudahood ah.    Waqtigani waxaa dhici karta in uu yar yahay si loo xaqiijiyo in aad waqtigii loogu talagalay ku timaado booqashadaada.
- Shaqaalaha dejiya gaadiid raacidu waxay la socdaan safarrada oo dhan waxayna macluumaad cusub siin doonaan darawaliinta.  Waxay la socdaan goobaha ay ku sugan yihiin darawaliinta oo xalliyaan arrimaha la xiriira soo qaadista iyo dejinta.
- Shaqaalaha NEMT ayaa gacan ka geysan doona isbeddelada gaadiid raacida, oo ay ku jiraan:
    - isbeddelada dejinta aan la filayn; iyo sidoo kale
    - isbeddelada waqtiga ee safarka uu saameeyay adeeg bixiye kale haddii loo baahdo.
- Ma jiri doono darawal beddeli doona waqtiga qaadista ee dejisan iyada oo aan oggolaansho hore, diiwaan gashan laga haysan WellRide.

Adiga ayaa ka mas'uul ah:

- Ula dhaqanka darawaliinta iyo gaadiid raacayaasha kale si ixtiraam leh.
- U soo wicitaanka sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodo si aad u dejiso, u beddesho, ama u joojiso gaadiid raacid.
- Isticmaalka suumanka gaariga, kuraasta gaariga ama qalabka kale ee badbaadada ee uu baahan yahay sharciga Oregon.
- Waqti hore in aad sii codsato meelo badan oo la joogsanayo. Haddii aad u baahan tahay in aad joogsato meel la daboolo-tusaale ahaan, haddii aad u baahan tahay in aad joogsato farmashiye ama goob kale oo la daboolo, waa inaan ansixinaa iyada, darawaliinta waxaa loo oggol yahay oo kaliya in ay joogsadaan kuwa la ansixiyay.

## Masaafada la socdo, Cuntooyinka, iyo Hoyga Lacagtiisa la isku soo celiyay (Dib loo bixiyay)

Lacag isku soo celintu waa codsiga in dib loo bixiyo lacagta masaafada la socdo 'mileage', cuntooyinka, ama hoyga aad lacagtooda bixisay.
Oggolaanshaha hore ama caddeynta adeeg bixiyaha ee booqashada si dib loogu bixiyo lacagta ayay dhici kartaa in loo baahdo si loo codsado masaafada la socdo 'mileage', cuntooyinka, iyo hoyga la aado adeegyada caafimaadka ee caymiskooda la daboolo si loogu qalmo dib u bixinta lacagta.

Si aad u codsato ama u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u bixinta lacagta **Adeega Macmiilka ka wac 844-256-5720** waxay kuu soo diri doonaan foom oo kuu sheegi doonaan sida loo codsado dib u bixinta lacagta iyo waxa lala soo dirayo. Foomka iyo wixii macluumaad ah waa in la soo diraa ka hor inta aysan dib u bixinta lacagtu dhici karin.

Codsiyada waa in lagu helaa muddo 45 maalmood gudahood ah ka dib safarkaaga. Codsiyada la helo ka dib 45 maalmood waa la diidi doonaa iyada oo Ogaysiinta Go'aaminta Gargaarka Aan Wanaagsanayn (NOABD) loo soo diri doono xubnaha leh rafcaan iyo xuquuqda dacwad dhageysiga.

YCCO waa in ay xubnaha dib ugu soo celisaa lacag muddo 14 maalmood gudahood ah ka dib marka la helo codsiga lacag isku soo celinta. YCCO waa in ay ku soo saartaa NOABD muddo 14 maalmood gudahood ah haddii lacag celinta xubinta la diido sabab kasta ha aheetee, iyada oo haddii codsiga xubinta ee lacag isku soo celinta uu yahay mid aan dhammeystirnayn, YCCO ay tahay in ay qaadato 14 maalmood oo dheeraad ah si ay qofka xubinta ah uga caawiso dhammeystirka soo gudbinta.

### Dib u bixinta Lacagta Cuntada

Cuntooyinka waxaa lacagtooda la bixiyaa oo kaliya marka qofka xubinta ahi safro:

- Safarku waa in uu noqdaa ugu yaraan 4 saacadood oo ah safar soo noqod leh

**Dib u bixinta Lacagta Hoyga**
Hoyga waxaa lacagtiisa dib loo bixiyaa marka:

- Qofka xubinta ah tahay in uu safro ka hor 5 subaxnimo si uu gaaro booqashadiisii dejisan;
- Safarka ka imaanaya booqasho dejisan uu dhammaan doono 9 habeenimo ka dib;
- Marka daryeel caafimaad bixiyaha xubintu uu diiwaangeliyo  baahi caafimaad; ama
- Sababo kale oo ah go'aanka YCCO

Cuntada iyo Hoyga waxaa lacagtooda dib loo bixin karaa oo loogu talagalay hal caawiye, kaasi oo noqon kara waalid, si uu u raaco qofka xubinta ah haddii caafimaad ahaan loo baahdo haddii:

- Qofka xubinta ahi yahay ilme yar oo uusan awoodin in uu safro caawiye la'aan;
- Adeeg bixiyaha xubintu bixiyo qoraal saxiixan oo leh sababta ay tahay in caawiyuhu ula safro qofka xubinta ah;
- Qofka xubinta ahi uu jir ahaan iyo maskax ahaanba awoodin in uu gaaro booqashadiisa caafimaad iyada oo aan la caawin;
- Qofka xubinta ahi uu yahay ama uusan awoodi lahayn in uu ku soo noqdo guriga caawimaad la'aan ka dib daaweyn ama adeeg; ama
- Sababo kale oo ah go'aanka YCCO

Waxaa dhici karta in aan xubnaha dib u siino lacagta cuntooyinka ama hoyga ee caawiyayaasha dheeraadka ah ama duruufo la xiriira go'aankayaga.

**Dib u bixinta Lacagta Masaafada la socdo**
Marka qof ama hay'ad aan ka ahayn xubinta ama waalidka dhalay qofka xubinta ah ee yar ama mas'uul uu gaadiid raacid bixiyo, waxaa dhici karta in aan lacag siino qofka ama hay'ada bixisay gaadiid raacida. Wac adeega macmiilka wixii macluumaad dheeraad ah.

Masaafada la socdo 'mileage', waxaa dhici karta in la bixiyo lacagtooda loogu talagalay safarka lagu tagayo oo lagaga soo noqonayo adeegyo la daboolo haddii aad adiga naftaadu gaariga u kaxaysato booqashada. Waa in aad codsataa in lacag lagu siiyo oo isticmaasho foomka aan kuu soo diri doono. Waxaa dhici karta in aad u baahato in aad na siiso caddeyn, waxaanan sidoo kale caddeyn doonaa in aad tagtay booqashadaada ka hor inta aynaan lacagta ku siin. Haddii aan caddeyn kari weyno in aad tagtay booqasho aad codsanayso in lacag lagugu siiyo, waxaa dhici karta in aanu diidno codsigaaga.   Waxaanu kuu soo diri doonaa NOABD kuu sheegaysa sababta aan u nidhi maya.

**Lacagaha siyaadada ee la bixiyo**
Marka masaafada la socdo 'mileage', cuntooyinka ama hoyga ay lacagtiisa bixiso YCCO iyo qof kale waxaa loo yaqaan lacag siyaado ah oo la bixiyay. Waxaa dhici karta in aan kaa codsano in aad dib u bixiso lacagta aanu ku siinay dib u bixinta lacageed haddii aanu xaqiijino in:

- Qofka xubinta ah si toos ah loo siiyay lacagta safarka lagu tagayay booqashooyinka caafimaad, oo aan lacagtana u isticmaalin ujeedadaasi, uusan tagin booqashada, ama gaari la wadaagin xubin kale oo sidoo kale si toos ah lacag loo siiyay;
- Kaararka ama tigidhada gaadiidka dadweynaha, uu qofka xubinta ahi iibiyay ama haddii kale iyaga siiyay qof kale;
- Gaadiid raacida, hoyga ama cuntooyinka oo qof kale sidoo kale lacagtooda siiyay:
    - Qofka xubinta ah; ama
    - Gaadiid raacida, hoyga ama bixiyaha cuntada si toos ah

**Jadwalka Kharashka Dib u bixinta Lacagta**
YCCO waxay xubnaha dib u siin doontaa lacagta masaafada la socdo 'mileage', cuntooyinka iyo hoyga oo gaarsiisan heerka lacageed oo aan ka yarayn heerarka OHA ee la oggol yahay.

| | |
|---|---|
| Masaafada uu socdo Baabuur Gaar loo leeyahay | $ .44 maylkiiba |
| Cuntooyinka Xubinta | $27.00 maalintii |
| Quraacda (Safarku wuxuu bilaabmaa ka hor 6 subaxnimo) | $8.00 |
| Qadada (Safarku waa in uu socdaa waqtiga oo dhan laga bilaabo 11:30 subaxnimo ilaa 1:30 galabnimo) | $8.50 |
| Cashada (Safarku wuxuu ku eg yahay 6 galabnimo ka dib) | $10.50 |
| Cuntooyin Caawiyaha | $27.00 maalintii |
| Cuntooyin Caawiyaha | Quraacda $8.00,<br>Qadada $8.50,<br>Cashada $10.50 |
| Hoyga Xubinta | $98.00 habeenkiiba |
| Hoyga Caawiyaha (Haddii la joogayo qol gooni ah) | $98.00 habeenkiiba |

YCCO waxaa dhici karta in ay sii hayso dib u bixinta lacagta ka yar qaddarka lacageed ee $10.00 marka codsiyada dib u bixintu gaaraan $10.00 lacag bixinta waxaa loo diri doonaa xubinta.

## Nidaamka Tabashada (Cabashooyinka, Tabashooyinka, Rafcaanada & Dacwad Dhageysi Caddaalad ah)

Waxaan xaqiijinaa in dhammaan xubnuhu heli karaan nidaamka tabashada. Waxaan isku daynaa in aan u fududeyno xubnaha in ay gudbiyaan cabasho ama rafcaan iyo in ay helaan macluumaad ku saabsan sida looga gudbiyo dacwad dhageysi lala leeyahay Maamulka Caafimaadka Oregon.

Nala soo socodsii haddii aad u baahan tahay caawimaad ama macluumaad dheeraad ah oo ah qayb ka mid ah habka Nidaamka Tabashada. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad oo ka badan waxa ku jira tilmaamahani, ama buug-gacmeedka xubinta, Adeega Macmiilka ka wac 844-256-5720 ama TTY 711.

YCCO, qandaraaslayaasheeda, iyo daryeel bixiyayaasha ka qayb qaadanaya ma:

- Joojin karaan qof xubin ah oo kama joojin karaan isticmaalka qayb kasta oo ka mid ah nidaamka tabashada ama ma qaadi karaan tallaabo ciqaab leh oo ka dhanka daryeel bixiye codsada natiijo degdeg ah ama taageera rafcaanka xubinta.
- Dhiirigelin karaan ka noqoshada cabashada, rafcaanka, ama dacwad dhageysiga hore loo gudbiyay; ama ma
- Isticmaali karaan gudbinta ama natiijada tabashada, rafcaanka, ama dacwad dhageysiga sabab la xiriirta falcelin ka dhan ah xubinta ama in la codsado ka saarida 'disenrollment' xubinta.
- Joojin karaan xubnaha in ay gudbiyaan cabasho ay hore u sameeyeen ama gudbinta cabasho isku mid ah haddii aanan sida uu qofka xubinta ahi jecel yahay si toos ah loola xallinin YCCO ee aan ahayn WellRide.

YCCO ma qaadi doonto tallaabo ciqaab leh oo ka dhanka daryeel bixiye kasta oo codsada natiijo degdeg ah ama taageera tabashada ama rafcaanka xubinta.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad oo ku saabsan Nidaamka Tabashada, sida siyaasadaha ama tusaalooyinka ogeysiinta, wac Adeega Macmiilka.  Haddii aad email ku soo dirto codsigaaga, si aad macluumaadka shakhsi ahaaneed uga dhigto mid sugan, xaqiiji in aad ku qorto "secure" mawduuca email-kaaga.

Nidaamka cabashada wuxuu diiwaan geliyaa, ka jawaabaa, wax ka qabtaa ama haddii kale u xalliyaa cabashooyinka si la mid ah haddii cabashadu ku saabsan tahay adeegyo ay bixisay YCCO ama mid ka mid ah qandaraaslayaashayada.

### Macluumaadka Nidaamka Tabashada

Website-kayaga ayaa leh macluumaad ku saabsan iyo dokumentiyo la isticmaalayo oo la xiriira Nidaamka Tabashada.

- Macluumaad Guud https://yamhillcco.org/members/benefits-and-rights/
- Siyaasada  https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/
- Foomamka cabashada https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/
- Foomamka rafcaanka https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/
- Foomka dacwad dhageysiga https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/

Waxaan sidoo kale kuu soo diri karnaa foom, si aad u codsato foom wac Adeega Macmiilka oo codso in mid boosta laguu soo diro.

## Cabashooyinka

Waxaad gudbin kartaa cabashooyin loogu talagalay faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon YCCO, oo uu ku jiro gaadiidka caafimaad ee aan degdega ahayn.  Waxaad gudbin karaa cabashooyin la xiriira NEMT, oo aan xad lahayn, sababaha aadan ugu qanacsanayn oo dhan, oo ay ku jiraan xuquuqdaada isticmaalaha NEMT.   Waxaad ka caban kartaa YCCO, WellRide, faa'iidooyinka, ama darawaliinta.  Waxaad gudbin kartaa cabasho ku saabsan arrin kasta oo aan ka ahayn ogeysiinta diidmada iyo waqti kasta kaasi oo ah dhanka afka ah ama qoraal ahaan ah.

**Sababaha qaarkood ee aad u gudbin karo cabasho ayaa ah:**

**Helitaanka gaadiid raacid:**

- Dhibaatooyinka helida gaadiid raacid.
- Dhibaatooyinka dejinta gaadiid raacid.

**Takoorka:**

- In aan la dareemin ixtiraam ama wax fahmeen darawaliinta, WellRide ama YCCO

**Ku habboonaanta adeegaaga:**

- Adeega aad lahayd oo aan ahayn nooc ku habboon baahiyahaaga.

**Tayada Adeega:**

- Adiga oo aan jeclayn adeega aad haysatay.
- Adiga oo helay biil loogu talagalay gaadiid raacidaada.
- Adiga oo si xun laguula dhaqmay.

**Tayada Daryeelka:**

- Badbaadada darawalka ama baabuurka

Haddii aad u baahan tahay in aad gudbiso cabasho adiga ayaa si gaar ah sidaasi u sameyn kara, ama adiga oo helaya caawimaad. Waxaad yeelan kartaa wakiil aad doorato, sida adeeg bixiyahaaga, in uu gudbiyo cabasho, tabasho, ama rafcaan. Si aad tani u sameyso, waa in aad bixiso oggolaansho qoraal ah.

YCCO, WellRide, ama darawaliintu ma joojin karaan ama iskuma dayi karaan in ay joojiyaan sameynta cabasho ku saabsan dhibaato oo aad hore cabasho ugu sameysay WellRide oo aadan ku raacsanayn go'aanka Khabiirka Tabashada ee YCCO ama sameynta cabasho aad u gudbiso YCCO iyo WellRide labadoodaba. Haddii aad rabto in aad cabashadaada ka dhigto mid qoraal ah waxaad warqad noogu soo diri kartaa boosta, email, ama fax. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foomamka cabashada YCCO ama OHP waxay ku jiraan website-kayaga waxaad ka heli kartaa halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/.

- Boosta: YCCO Grievance Specialist
  PO Box 5490
  Salem, OR 97304
- Email-ka: complaints@yamhillcco.org
  Waxaa dhici karta in aad yeelato macluumaad shakhsi ahaaneed oo ku jira email-kaaga. Geli "secure" saddarka mawduuca, si macluumaadkaagu u noqdo mid la ilaaliyo.
- Website-ka: yamhillcco.org
- Fax-ka: 503-765-9675
- Telefoonka: 833-257-2192 ama TTY 711

Waxaan sidoo kale kuu soo diri karnaa foom, si aad u codsato foom wac Adeega Macmiilka oo codso in mid boosta laguu soo diro.

## Sida loo sameeyo Cabasho

Anaga iyo daryeel bixiyayaashayadu waxaan rabnaa in aad hesho daryeelka u wanaagsan ee suurtagalka ah. Haddii aadan ku faraxsanayn YCCO, WellRide, adeegyadaada daryeelka caafimaadka, adeeg bixiyahaaga ama darawal, waxaad gudbin kartaa cabasho.

Waxaan isku dayi doonaa in aan wax wanaajino.  Kaliya Adeega Macmiilka ka wac 844-256-5720 (TTY 711).

Haddii aad rabto in aad cabashadaada ka dhigto mid qoraal ah waxaad warqad noogu soo diri kartaa boosta, email, ama fax. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foomamka cabashada YCCO ama OHP waxay ku jiraan website-kayaga waxaad ka heli kartaa halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/.

Boosta: Yamhill WellRide
Attn: Grievance Coordinator
16253 SE 130th Ave
Clackamas, OR 97015

- Email-ka: complaints@yamhillcco.org
  Waxaa dhici karta in aad yeelato macluumaad shakhsi ahaaneed oo ku jira email-kaaga. Geli "secure" saddarka mawduuca, si macluumaadkaagu u noqdo mid la ilaaliyo.
- Website-ka: yamhillcco.org
- Fax-ka: 503-857-0767 ama 503-765-9675
- Telefoonka: 844-256-5720 ama TTY 711

Waxaan sidoo kale kuu soo diri karnaa foom.  Si aad u codsato foom wac Adeega Macmiilka oo codso in mid boosta laguu soo diro.

**Waqtiyada Loo qabtay Cabashada**
Waxaad gudbin kartaa cabasho waqti kasta.

Waan baari doona doonaa cabashadaada oo kula soo socodsiin doonaa waxa la qaban karo sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay. Tani waxaa lagu sameyn doonaa muddo 5 maalmo shaqo gudahood ah laga bilaabo maalinta aan helnay cabashadaada.

Haddii aanu u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaanu warqad kuugu soo diri doonaa muddo 5 maalmo shaqo gudahood ah. Waxaan kuu sheegi doonaa sababta aanu ugu baahanahay waqti dheeraad ah. Waxaan kaliya codsan doonaa waqti dheeraad ah haddii uu yahay mid adiga kuu dan ah. Warqadaha oo dhan waxaa lagu qori doonaa luqadda aad doorbidayso. Waxaanu warqad kuugu soo diri doonaa muddo 30 maalmood gudahood ah marka aan helo cabashada oo sheegaysa sida aan wax uga qaban doono iyada.

Haddii aadan ku faraxsanayn sida aan wax uga qabanay cabashadaada, taasi waxaad la wadaagi kartaa Qaybta Adeega Macmiilka ee OHP oo laga helo 800-273-0557 ama fadlan la xiriir Barnaamijka Mas'uulka Wax u dooda ee OHA. Ombuds waxa wax u doodayaal u dooda xubnaha ka tirsan OHP waxayna sameyn doonaan intii karaankooda ah si ay kuu caawiyaan.  Fadlan email u dir OHA.OmbudsOffice@odhsoha.oregon.gov ama farriin ku dhaaf 877-642-0450.

**Helida Caawimaad si loo Gudbiyo Cabasho**
Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u gudbiso cabasho waxaad wici kartaa Adeega Macmiilka, qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah, ama hagaha

caafimaadka shakhsi ahaaneed. Adeega Macmiilka ayaa sidoo kale kaa caawin kara in aad hesho qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah ama hagaha caafimaadka shakhsi ahaaneed oo ku caawiya. Waxaad Adeega Macmiilka ka wici kartaa 855-722-8205.

## Ogaysiinta Go'aaminta Gargaarka Aan Wanaagsanayn (NOABD)

Haddii aan diidno, joojino, ama yareyno adeega caafimaadka, ilkaha, hab-dhaqanka caafimaadka, ama gaadiidka, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad diidmo ah oo wax kaaga sheegaysa go'aankayaga. Warqadan diidmada waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Ogaysiinta Go'aaminta Gargaarka Aan Wanaagsanayn (NOABD).

Marka codsiga gaadiid raacidaada la diido, ka hor inta aynaan kuu soo dirin NOABD, shaqaale kale ayaa sameeya dib u eegis labaad si loo hubiyo in ay sax tahay.

NOABD-gaaga waxaa boosta lagu soo diri doonaa muddo 72 saacadood gudahood ah ee diidmada ku socota:

- Xubinta loo diiday gaadiid raacid, iyo
- Adeeg bixiyaha ama koox saddexaad oo kale kaasi oo uu xubintu lahaa booqasho loo dejiyay, marka adeeg bixiyuhu uu yahay qayb ka mid ah nidaamka YCCO, oo uu codsaday gaadiid raacid isaga oo wakiil ah xubinta.

Haddii in codsigaaga la diiday laguugu sheego telefoon ahaan laakiin aadan helin NOABD 72 saacadood ka dib, waxaad wici kartaa Adeega Macmiilka oo ka codsan kartaa in mid laguu soo diro mar kale.

Marka adeeg bixiyuhu kuu sheego in aad u baahan yahay in aad bixiso lacagta adeeg aan la daboolin, waxaad codsan kartaa nuqulka NOABD-gaaga oo muujinaya in adeegu yahay mid aan la daboolin. Marka aad hesho NOABD-gaaga waxaad codsan kartaa rafcaan.

## Rafcaanada

Marka aad hesho NOABD-gaaga, adiga, wakiilkaaga, ama adeeg bixiyahaaga, oo haysta oggolaanshahaaga oo qoraal ah waxay xaq u leeyihiin in ay beddelaan diidmada iyada oo la adeegsanayo rafcaan ama dacwad dhageysi caddaalad ah. Waa in aad ku gudbisaa rafcaankaaga muddo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ku qoran NOABD.

Haddii go'aankaaga rafcaan uusan beddelin diidmada, waxaad ka dib codsan kartaa dacwad dhageysi caddaalada ah ee gobolka.  Waa in aad dhageysi dacwada ku codsataa muddo 120 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ku qoran warqada Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka (NOAR).

Waa in aad marka hore codsataa rafcaan oo heshay ogeysiin ah in diidmada koowaad la oggolaaday ka hor inta aadan codsan karin dacwad dhageysi.   Waxaad sidoo kale codsan kartaa dacwad dhageysi haddii aad gudbiso rafcaan oo aanu dhaafno waqtiyada loo qabtay rafcaanka ee la iskaga baahan yahay.

Rafcaanada Adeeg Bixiyaha

Haddii uu adeeg bixiyahaagu diro rafcaan loogu talagalay adeeg la diiday ama oggolaansho iyada oo aan la haysan oggolaanshahaaga, YCCO waxay sameyn doontaa rafcaanka adeeg bixiyaha; adeeg bixiyayaashu waxay wici karaan Adeega Macmiilka wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii uu adeeg bixiye rafcaan qaato isaga oo aan haysan oggolaanshahaaga, ma isticmaalo xuquuqdaada rafcaanka.

### Sababaha aad u gudbin karta rafcaan:

- Codsigaagii in lacag lagugu siiyo masaafada la socdo 'mileage' ee loogu talagalay ballamaha caafimaad ee aan degdega ahayn oo la diiday.
- Adiga oo laguu diiday codsiga NEMT.
- Adiga oo laguu diiday adeeg buuxa ama qayb ahaana.

### Sida rafcaan looga qaato go'aan

Waxaad xaq u leedahay in aad taageerto rafcaankaaga, bixiso macluumaad oo marqaati furto shakhsi ahaan ama qoraal ahaan, oo aad dood sharci ah ama xaqiiqo ah shakhsi ahaan ama qoraal ahaan ku sameyso wakhtiga loo qabtay gudbinta rafcaank gudihiisa.

Si aad u gudbiso rafcaan waxaad wici kartaa Adeega Macmiilka oo ka codsan kartaa in aad ku gudbiso telefoon ahaan. Waxaad sidoo kale buuxin kartaa foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad (OHP 3302) ee laguugu soo diray NOABD-gaaga iyo boosta ama email noogu soo dir.  Nuqulka foomku wuxuu ku jiraa website-kayaga halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/ waad ka soo dejisan kartaa iyada oo buuxin kartaa iyada oo email iyo boosta noogu soo diri kartaa iyada.

- Boosta: Yamhill WellRide<br>Attn: Rafcaanada<br>16253 SE 130th Ave<br>Clackamas, OR 97015
- Email-ka: appeals@yamhillcco.org<br>Waxaa dhici karta in aad yeelato macluumaad shakhsi ahaaneed oo ku jira email-kaaga. Geli "secure" saddarka mawduuca, si macluumaadkaagu u noqdo mid la ilaaliyo.
- Website-ka: yamhillcco.org
- Fax-ka: 503-857-0767 ama 503-765-9675
- Telefoonka: 844-256-5720

### Helida Caawimaad si loo Gudbiyo Rafcaan

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ah gudbinta rafcaankaaga, waxaad ka codsan kartaa wakiilkaaga la oggol yahay ama adeeg bixiyahaaga. Adeeg bixiyahaagu wuxuu gudbin karaa rafcaan isaga oo kaa wakiil ah oo haysta oggolaanshahaaga oo qoraal ah. Adeega Macmiilka ayaa sidoo kale kaa caawin kara in aad hesho shaqaalaha daryeelka caafimadka oo la aqoonsan yahay, qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah, ama hagaha caafimaadka shakhsi ahaaneed oo ku caawiya. Waxaad Adeega Macmiilka ka wici kartaa 855-722-8205.

## Waqtiyada Loo qabtay Rafcaanka

Waa in aad ku gudbisaa rafcaankaaga muddo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ku qoran NOABD.

Waxaad Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka (NOAR) nagaga heli doontaa muddo 16 maalmood gudahood ah oo kula socodsiinaysa haddii qofka dib u eegista sameynayaa ku raacsan yahay ama aanu ku raacsanayn go'aanka NOABD.

Haddii aanu u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaan kuu soo diri doonaa warqad. Waxaanu haysan doonaa ilaa 14 maalmod si aan u soo jawaabno.

## Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka (NOAR).

NOAR waa warqada aad naga heli doonto si aan kuugu sheegno natiijooyinka rafcaankaaga. Waxay kuu sheegi doontaa haddii aanu ku raacsanahay ama aanu ku raacsanayn go'aanka NOABD. Foom lagu gudbinayo dacwad dhageysi ayaa lala soo diri doonaa NOAR-kaaga si laguu siiyo fursad lagu gudbiyo dacwad dhageysi haddii aadan ku raacsanayn go'aanka rafcaanka ama haddii ay YCCO rafcaankaaga ku xallin waydo waqtiyada la qaybtay ee la iskaga baahan yahay.

## Rafcaanada Degdeg ah

Waxaad codsan kartaa rafcaan degdeg ah. Na soo wac ama fax noogu soo dir foomka OHP 3302. Codso rafcaan degdeg ah haddii sugitaanka rafcaanka caadi ah uu khatar gelin karo noloshaada, caafimaadkaaga, ama awoodda aad u leedahay in aad shaqeyso. Waanu ku soo wici doonaa waxaanan warqad kuugu soo diri doonaa, muddo 1 maalin shaqo gudaheed ah, si aan kuula socodsiino in aanu helnay codsigaagii rafcaan degdeg ah.

Haddii aad hesho rafcaan degdeg ah, waxaan go'aankayaga u gaari doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay, wax aan ka badnayn 72 saacadood laga bilaabo marka codsiga rafcaanka degdega ah la helay. Waanu isku dayi doonaa intii karaankayaga ah in telefoon ahaan lagula soo xiriiro adiga iyo adeeg bixiyahaaga sii aan kuula socodsiino go'aankayaga. Waxaad sidoo kale heli doontaa warqad.

Codsigaaga ama haddii aanu u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaa dhici karta in aan kordhino waqtiyada loo qabtay ilaa 14 maalmood.

Haddii rafcaan degdeg ah la diido ama waqti dheeraad ah loo baahdo, waanu ku soo wici doonaa waxaanad ogeysiin ku heli doonaa muddo 2 maalood gudahood ah. Codsiga rafcaan degdega ah oo la diiday wuxuu noqon doonaa rafcaan caadi ah.

## Dhinacyada Nidaamka Rafcaanka

Kuwa leh ama codsanaya rafcaanku waa dhinacyada. Waxay noqon karaan xubinta ama wakiilkooda ama wakiilka sharciga ah ee hantida xubinta geeriyooda.

## Xubnaha Labadabada U qalma iyo Xuquuqda Rafcaanka

Haddii aad iska diiwaan gelisay YCCO OHP iyo Medicare labadoodaba, waxaa dhici karta in aad yeelato xuquuqda rafcaanka oo ka badan kuwa qoran.  Waxaad sidoo kale wici kartaa Medicare si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada rafcaanka ee aad la leedahay iyaga.

## Dacwad Dhageysi Caddaalad ah

Rafcaan ka dib, adiga, wakiilkaaga la oggol yahay, ama adeeg bixiyahaaga oo haysta oggolaanshahaaga oo qoraal ah waxaad codsan kartaan dacwad dhageysi caddaalad ah oo lala yeesho Qareenka Maamulka Sharciga ee Oregon, tani waxaad ku samayn kartaa dhanka afka ama qoraal ahaan.

### Sababaha aad u gudbin karto dhageysi dacwad:

- Codsigaagii rafcaanka oo aan la oggolaan.
- YCCO oo rafcaankaaga ku xallin wayda waqtiyada la qaybtay ee la iskaga baahan yahay.

Waxaad haysan doontaa muddo 120 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ku qoran NOAR-kaaga si aad gobolka uga codsato dacwad dhageysi.

Warqadaada NOAR waxay lahaan doontaa foom aad soo diri karto si aad u codsato dacwad dhageysi.

Marka la joogo dacwad dhageysiga, waxaad xaakimka u sheegi kartaa sababta aadan ugu raacsanayn go’aankayaga iyo sababta adeegyada ay tahay in loo daboolo.  Waxaad xaq u leedahay in aad yeelato qareen ama wakiil jooga dacwad dhageysiga. Ma aha in aad haysato qareen si aad u gudbiso dacwad dhageysi.

Waxaa jira taageerada dhanka sharciga ah oo lacag la’aan ah:
Adeega Gargaarka Sharciga iyo Khadka Gargaarka Dadweynaha ee Xarunta Sharciga Oregon
800-520-5292 ama TTY 711

Dacwad dhageysigu wuxuu qaataa in ka badan 30 maalmood in la diyaariyo.  Inta aad ka sugayso dacwad dhageysigaaga, waad sii wadan kartaa in aad hesho adeega isla hadaba aad bilowday ka hor go’aankayagii rasmiga ahaa ee NOABD ee in la joojiyo.

Waa in aad ku codsataa in gobolku sii wado adeega muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda NOAR-kayaga xaqiijisay diidmadayada.

Markaa uu dacwad dhageysigaagu dhaco ee la xalliyo waxaad heli doontaa warqad (loo yaqaan “Final Order”) oo kuu sheegaysa natiijooyinka dacwad dhageysigaaga.

### Dacwad Dhageysi Degdega ah oo loogu talagalay Dhibaatooyinka Daryeelka Caafimaadka Degdega ah

Nidaamka dacwad dhageysigu wuxuu qaataa waqti. Haddii aad u baahan tahay dacwad dhageysi degdeg ah iyada oo sababtu tahay sugitaanka dacwad dhageysiga caadiga oo waxyeelo halis ah kuu geysan kara, xaqiiji in aad taasi ku xusto foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad. Kooxda Dacwad Dhageysiga Caafimaad ee Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa dib ugu eegi doonta codsigaaga loogu talagalay dacwad dhageysi degdeg ah. Haddii codsigaaga la diiday, waxaad warqad ku heli doontaa muddo laba maalmood gudahood ah si laguula socodsiiyo.

Foomkaaga codsiga dacwad dhageysiga fax ugu soo dir:
Kooxda Dacwad Dhageysiga OHP oo laga helo 503-945-6035
Ku soo dar qoraal ku qoran foomka oo ka socda adeeg bixiyahaaga oo sheegaya sababta uu degdega u yahay.

OHA ayaa go'aamin doonta haddii aad xaq u leedahay dacwad dhageysi degdeg ah, sida ugu dhow ee suurtagalka ah, laba maalmo shaqo laga bilaabo taariikhda ay helaan dokumentiyada codsigaaga degdega ah. Haddii Kooxda Dacwad Dhageysiga OHA diido codsiga dacwad dhageysiga degdega ah, waxay sameyn doonaan dadaalo macquulka si laguu siiyo ogeysiin dhanka afka ah oo degdeg ah oo boosta lagu soo diro ogeysiin qoraal ah muddo laba maalmood gudahood ah.

**Matalaada marka la joogo Dacwad Dhageysiga**
Waxaad xaq u leedahay in aad yeelato qof kale oo aad doorato oo kuu istaaga dacwad dhageysiga, sida saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, qareen, ama bixiyahaaga caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad naftaada u istaagto haddii aad doorato. Haddii aad qareen qabsato, waa in aad bixisaa kharashkiisa. Waxaad wici kartaa Khadka Gargaarka Dadweynaha (barnaamij ka tirsan Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon iyo Xarunta Sharciga Oregon) teleefoonka 800-520-5292, TTY 711, si aad u hesho talo iyo qofka kaa noqda wakiil Macluumaad ku saabsan taageerada dhanka sharciga ah ayaa sidoo kale laga heli karaa oregonlawhelp.org.

**Sida Loo codsado Dacwad Dhageysi**
Si aad u codsato dacwad dhageysi, foomka Codsiga loogu talagalay Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad (OHP 3302) u soo dir:
OHA Medical Hearings
500 Summer Street NE E49
Salem, OR 97301
Fax-ka: 503-945-6035

## Sii socoshada Faa'iidooyinka ama Adeegyada Inta lagu jiro Rafcaan iyo/ama Dacwad Dhageysi

Haddii aad helaysay faa'iidada ama adeega aanu diidnay oo aanu joojinay in aanu bixino iyada, waxaad naga codsan kartaa in aanu sii wadno inta lagu jiro nidaamka rafcaanka ama dacwad dhageysiga.

Waxaad u baahan tahay in aad:

- Ku codsato muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ogeysiinta ama taariikhda uu go'aankani dhaqan galo, hadba tii dambaysa.
- Isticmaal foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad.  Foomkani waxaa lala soo diray NOABD. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa dhanka internet-ka halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/ ama halkan https://bit.ly/request2review.
- Ku jawaab "haa" su'aasha ku saabsan sii wadida adeegyada ee ku qoran sanduuqa 8 ee bogga 4 ee foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad.

**Bixinta lacagta Faa'iidooyinka ama Adeegyada Joogtada ah**
Haddii aad doorato in aad weli hesho faa'iidada ama adeega la diiday, waxaa dhici karta in aad bixiso lacagtiisa.  Haddii aanu beddelno go'aankeena inta lagu jiro rafcaanka, ama haddii garsooruhu kugu raaco marka la joogo dacwad dhageysiga, ma bixin doontid lacagta.

Haddii aanu beddelno go'aankeena oo aadan helayn adeega ama faa'iidada, waxaan u ansixin doonaa ama u bixin doonaa adeega ama faa'iidada sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay.  Waxaanu qaadan doonaa wax aan ka badnayn 72 saacadood laga bilaabo maalinta aan helno ogeysiinta ah in go'aankayagii laga noqday.

## Badbaadada iyo Raaxada Gaadiid Raacaha

Darawalku wuxuu u hoggaansami doonaa heerarka badbaadada iyo raaxada ee gaadiidka degaanka, gobolka, iyo federaalka.  Gaadiid raacida waxaa lagu bixiyaa baabuur iyo van-ka oo buuxinaya xeerarka ruqsad bixinta degaanka iyo oggolaanshaha wax lagu wado iyo sidoo kale kuwa hoos ku qoran.   Gaadiid raacida waxaa bixiya darawaliin buuxinaysa dhammaan xeerarka oo maray dhammaan hawlaha shaqaaleynsiinta-hore ee la iskaga baahnaa.   Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tani ayaa hoosta ku qoran.

Baabuurku wuxuu yeelan doonaa dhammaan qalabkan badbaadada:
- Suumanka badbaadada oo loogu talagalay dhammaan gaadiid raacayaasha haddii baabuurka sharci ahaan looga baahan yahay in uu yeesho iyaga,
- Xirmada gargaarka degdega ah,
- Qalabka dabka lagu damiyo 'fire extinguishers',
- Calaamadaha waddada dhinaceeda ee iftiima mugdiga ama qalabka digniinta,
- Tooshka,
- Silsiladaha barafka ee taayirada marka loo baahdo,
- Gacmo gashiga la tuuro, iyo
- Dhammaan qalabka oo si hab ammaan ah loogu kexeeyo gaadiid raacayaasha ay dhici karto in ay isticmaalaan kursiga naafada ama sariirta 'stretcher' loogu talagalay baabuurtaasi sameysa noocyadan gaadiid raacid.

## Xeerarka Baabuurka iyo Darawalka

### Xeerarka baabuurka:

- Baabuurku in uu nadiif yahay oo ka xor yahay qashin.
- Lama oggola in sigaar lagu cabo baabuurta.
- Lama oggola waxyaabaha la isku buufiyo ‘aerosol’ ama uumiga bixiya ‘vaporizing’ ee baabuurta .
- Qalabka badbaadada ee Badbaadada iyo Raaxada Gaadiid Raacaha ee dhinaca sare.
- Qalabka badbaadada oo si hab ammaan ah loogu kexeeyo gaadiid raacayaasha isticmaalaya kursiga naafada ama sariirta ‘stretcher’.
- Hagaajinta si baabuurka loo sameeyay sida uu soo jeediyay baabuur sameeyuhu.
- Kuraasta gaariga, hoonka, diirinta, qaboojiyayaasha hawada, hawada soo galaysa, nalalka leexadka, nalalka hore, nalalka dambe, qalabka muraayada gaariga tirtira oo dhammaantood shaqeynaya. Baabuurku waa in uu leeyahay muraayadaha dhinaca iyo gadaasha.

### Xeerarka darawalka:

- Waa in uu ku gudbaa baaritaanka taariikh dambiyeedka.
- Ruqsadda baabuur wadista gobolka ee darawalka oo leh taageerada loo baahan yahay oo la xaqiijiyay.
- Darawalku waa in uu maraa baaritaanka iska reebida ka qayb qaadashada barnaamijyada federaalka.
- Uu wax ka og yahay adeegyada NEMT, degaanka uu gaadiid raacida ka bixinayo, shilka, musuqmaasuqa, iyo warbixinnada xadgudubka, iyo sida baabuurku u shaqeeyo.
- Darawalku waa in uu sameeyay koorsada Wadista Baabuurka ee Difaaca Golaha Ammaanka Qaranka ama koorso leh macluumaad  u dhigma oo lagu sameynayo 3 bilood gudahood ah ee is shaqaaleysiinta iyo 3-dii sano ee kasta.
- Waa in uu yahay mid aqoonsi ka haysta gargaarka degdega ah oo ay Red Cross ansixisay, dib u soo kicinta wadnaha/sambabada ‘cardiopulmonary resuscitation’, iyo koorsada nidaamka daadinta dhiiga, ama mid leh macluumaad u dhigma ka hor intaan la kaxayn wax xubno ah.
- Darawalku waa in uu sameeyay koorsada badbaadada iyo adeega gaadiid raacaha ama mid leh macluumaad  u dhigma oo lagu sameynayo 3 bilood gudahood ah ee is shaqaaleysiinta iyo 3-dii sano ee kasta.
- Uu wax ka og yahay dhammaan nidaamyada lagaga jawaabayo baahiyaha xubnuhu u qabaan daryeel degdeg ah haddii loo baahdo inta lagu jiro gaadiid raacid.
- Darawalku u hoggaansami doono dhammaan sharciyada wadista baabuurka iyo gaadiidka ee gobolka.

Darawaliintu waa in ay WellRide u sheegaan ku xadgudub kasta oo ah sharciga mukhaadaraadka ee gobolka ama wixii isbeddelo ah ee ku yimaada taariikhdooda wadista baabuurka, tani waxaa ka mid ah tigidhada taraafiga oo kasta.

## Macluumaad Dheeraad ah

Kama nihin mas'uul qorsheynta gaadiid raacida haddii basaska magaalada la isticmaalo, ama haddii xubintu ama qof kale helo dib u bixinta lacagta masaafada la socdo ama sida u qaadista xubin booqashooyinkiisa.

**Haddii aad rabto in aad waxyaabo dheeraad ah ka ogaato WellRide, website-kayaga ka booqo:**
https://yamhillcco.org/members/transportation/